



Warqada ku socota waalidiinta/xannaaneeyayaasha ay khuseyso Nitbusters: Injirta madaxa ee barnaamijka dugsiga

Letter to parents/carers concerning Nitbusters: Head lice in schools program

Magaca ilmaha _____ Fasal _____
Child's name _____ Class _____

Taariikhda Maalinta Nitbusters _____
Date of Nitbusters Day _____

Taariikhda la soo celinayo foomka ka raali ahaanshaha _____
Date for return of consent form _____

Gacaliye Waalid/xannaaneeye

Nitbusters waxay ujeedadeedu tahay in waxlabaro dugsiyada, carruurta iyo waalidiinta ku saabsan injirta madaxa iyo sidii laysaga saari lahaa.

Waxaan kuugu soo qorayaa si aan u codsado ogolaanshahaaga inuu ilmahaagu ka qaybgalo Maalinta Nitbusters ee lagu qaban doono dugsiga maalinta kor ka muuqata. Maalinta Nitbusters waa maalin ay waalidiinta laga yaabo inay caawiyaan si loo iskiriingareeyo oo loona daaweeyo dhammaan carruurta qabta injirta madaxa.

Ilmo kasta waxaa lagu dhiirigelinayaa inuu ka soo qaybgalo. Ilma ka qaybgeli karaa ma jiro ilaa uu saxiixo jiro mooyee foom ka raali ahaanshaha, looma ciqaabi doono ka qayb qaadasho la'aantooda si kastaba. Waalidiinta/xannaaneeyayaasha iyo/ama carruurta way ka saari karaan.

Maalinta Nitbusters ilmo kasta oo ka soo qabygalaya timihiisa waa la eegayaa baarayaa si loo go'aamiyo haddii ay jirto ku badan tahay. Waalidiinta na caawinaya waxay xiran doonaan gacma gashi la tuuri karo gacmo gashiga, labadaba iskiriingareynta iyo nidaamka daaweynta. Haddii qandhicilka (ukunta) ama injirta laga helo ka dib shaambooga timaha caadiga ah ayaa timaha la marinayaa oo lagu shaleyayaa. Ka dib marka lagu kala furfuro timaha isheysta shanlo weyn, shanlada injirta ee yar yar ayaa sidoo kale loo isticmaalayaa in lagu saaro ukunta iyo injirta. Gacmo gashiga ayaa la bedeli doonaa inta u dhaxeysa ilmo kasta oo shakhsi ah daaweyntiisa ka dib. Haddii ilmaha madixiisu uu ku tuso calaamado infekshin ama caddeyn meelo go'an ama psoriasis, ilmaha lama daaweyn doono lamana iskiriingareyn doono.

Marka la dhameystiro ilmaha timihiisa waa la shanleynayaa oo la nadiifinayaa. Shaambooga lagama biyo raacin doono maadaama ay adag tahay intan lagu sameeyo dugsiga. Shaambada waxyeelayn doonto timaha waana laga biyo raacin karaa marka ilmuhu guriga ku soo noqdo.

Dhammaan shanlooyinka waa la nadiifinayaa inta u dhaxeysa daaweyn kasta waxaana la isticmaalayaa biyo kulul oo saabuun leh waxaana lagu biyo raacinayaa biyo socda maadaama injirta madaxu ay ku dhimato darajada 60naad ee celcius.

Qoraal ayaa guriga loo soo diri doonaa iskiriingareynta ka dib si loogu wargeliyo haddii qandhicilka, injirta ama labadaba iyo injir laga helay ilmahaaga. Dhammaan waalidiinta waxaa la siin doonaa warqada macluumaadka oo ku saabsan sidii loo daaweyn lahaa injirta madaxa haddii ilmahoodu uusan ka qayb qaadan barnaamijka.

Nitbusters si loogu guuleysto dugsigeena, ilmo kasta waa inuu ku lug yeeshaa. Waxay ku qaadanaysaa in hal madax oo qaba injirta inuu fasalka oo dhan qaadsiiyo. Fariin muhiim ah waxaa weeye in qof kasta qaadi karo injirta madaxa iyadoon loo eegeyn da', jinsi ama asalkiisa. Daaweynta waxay u baahan tahay inay noqoto wax bulsho ahaan ku saleysan oo sii socota.

Barnaamijku wuxuu ku lug leeyahay bulshada dugsiga oo dhan oo wada shaqeynaysa si ay isugu xirnaadaan oo u maamulaan maalinta Nitbusters dhismaha dugsiga, haddii laysku dayo in laga daaweeyo madaxa ardeyga dhammaan hal mar. Guddiga waalidiinta dugsiga ayaa qabanqaabiya maalinta iyagoo caawiyayaal keena iskiriingareeya oo ka daaweeya dhamaan carruurta injirta madaxa. Iskiriingareynta waxaa u sameeya xannaaneeyaha/waalidka iskaaga ah fasal fasal ahaan, iyadoo carruurta ugu yar yar marka ugu horeysa la daaweynayo maalin dugsiyeedka. Barnaamijkan wuxuu isticmaalaa shanlo iyo hab shaambo ah oo lagu daaweynayo injirta madaxa oo ammaan ah.

Haddii aad ogolaato ka qaybqaadashada ilmahaaga Maalinta Nitbusters, fadlan ku buuxi Ingiriis foomka ka taali ahaanshaha oo ku soo celi dugsiga taariikhda kor ka muuqata. Foom gaar ah oo ka raali ahaansho waa in loo buuxiyaa ilmo kasta.

Macluumaadkan wuxuu ku saleysan yahay macluumaad lagu bixiyey website ka Nitbusters Caafimaadka NSW.